

Daryeelka bukaanka caabuqa/infakshanka · Infektionssjukvård

Cudurka qaaxada ee qarsoon oo aan la daweyn

Latent tuberkulos utan behandling



Cudurka qaaxada (TBC) waxaa keena ama sababa bakteeriyo.
Tuberkulos (TBC) är en sjukdom som orsakas av en bakterie.



Haddii qofka qaba cudurka qaaxada uu cuduku kaga dhaco xubnaha hawo mareenka isla markaana uu qofku aad u qufacayo muddo dheer, wuu qaadsiin karaa dadka kale.

Man kan smittas om en person som har tuberkulos i luftvägarna hostar på en under en lång tid.



Waxaa qofka ku dhici karaa cudurka qaaxada qarsoon (jiifta) ama qaaxada fir-fircoon midkood.




Man kan få antingen latent (vilande) tuberkulos eller aktiv tuberkulos.



Waxaa ku haya nooca lagu magacaabo qaaxada qarsoon (latent tuberkulos). Taas oo ay macnaheedu tahay in bakteeriada ama jeermisku jidhkaaga ku jiro, laakiin uu yahay mid nasanaya ama jiifa.

Du har det som heter **latent tuberkulos**. Det betyder att du har bakterierna i kroppen men de är vilande.



Ma xanuunsanid/jiranid islamarkaan ma qaadsiin kartid cid kale. Uma baahnid in lagu siiyo wax dawo ah.

Du är inte sjuk och du kan inte smitta någon annan. Du behöver inte få någon behandling.

Daryeelka bukaanka caabuqa/infakshanka · Infektionssjukvård

Cudurka qaaxada ee qarsoon oo aan la daweyn

Latent tuberkulos utan behandling




Haddii difaaca jidhku hoos u dhaco waxaa dhici karta in aad u xanuunsato cudurka qaaxada ee fir-fircoon. Sida caadiga ma dhacdo, laakiin waxaamuhim ah in aad ogaato, maadaama ay jirto halis ah in aad qaadsiin karto dadka kale isla markaana waa in lagu siiyo dawo.

Om din kropp försvagas kan du insjukna i **aktiv tuberkulos**. Det är ovanligt men viktigt att känna till eftersom du då riskerar att smitta andra och måste få behandling.



Calaamadaha caadiga ah ee lagu garto cudurka qaaxada ee fir-fircoon waa qufac muddo dheer haya qofka, xummad, dhidid wakhtiyada habeekee yimaada, abateetka oo hoos u dhaca iyo miisaanka oo hoos u dhaca.

De vanligaste symtomen på aktiv tuberkulos är långvarig hosta, feber, nattliga svettningar, nedsatt aptit och viktningång.



Waxaa kale oo dhici karta in ay qanjidhadu weynaadaan qofka (barar tusaale ahaan ku yimaada qanjidhada cunaha iyo kil-kilooyinka).

Man kan också få förstorade lymfkörtlar (svullnader i exempelvis hals och armhålor).



Haddii aad isku aragto calaamadaha lagu garto cudurka qaaxada fir-fircoon waxaa aad muhiim u ah in aad la xidhiidho hay'adaha daryeelka caafimaadka sida ugu dhakhsaha badan.

Om du får symtom på aktiv tuberkulos är det mycket viktigt att du tar kontakt med sjukvården så snart som möjligt. Vänd dig i första hand till oss på infektionskliniken.



Waxaa aad naga soo wici kartaa labarka telefoonka:

Du kan ringa oss på telefonnummer: _____